



**Hay'adda Nabadsugidda Waddanka (DHS-  
Department of Homeland Security)  
Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah iyo Xuriyadaha Dad-  
weynaha**

**Cabashada Xuquuqaha  
Dad-weynaha**

Nooca la Buuxiyo (ugu dambeyti la habeeyey 3/15/2011)

*Ulajeedada foomkan waa in adiga kaa gargaaro buuxinta cabashada Xuriyadaha Madaniga/Xuriyadaha Dad-weynaha ee aad ka buuxineyso Hay'adda Nabadsugidda Wadanka (DHS) Xafiiskeeda Xuriyadaha Madaniga/Xuriyadaha Dad-weynaha (CRCL) ee la xiriira barnaamijyada iyo howlaha ay bixiso DHS. Lagaagama baahna in aad foomkan isticmaasho si aad cabasho u gudbiso; waxaa ku filan warqad ay ku qoran tahay isla macluumaadka. Hase-yeshee, haddii cabashadaada aad warqad ku gudbinezeyso, waa in aad soo raacisaa isla macluumaadka foomka ku qoran ee lagaaga baahan yahay in aad soo raaciso.*

**Hadafka CRCL (CRCL - Xafiiska Xuquuqaha Madaniga iyo Xuriyadaha Dad-weynaha):**

Xafiiska CRCL ee Hay'adda Nabadsugidda Wadanka wuxuu taageeraa Hay'adda ayada oo hubineysa amaanka qaranka isla markaana dhowreysa xuquuqaha, cadaalada, shaqsiga, iyo sinnaanta sharciga hortiisa. Si DHS aan uga caawinno una hormarinno ilaalada guud iyo barnaamijyada, waxaynu baarnaa andacooyinka ku-tagri falka xuquuqaha madaniga iyo xuryadda dad-weynaha.,

**Miyaad DHS u qabtaa cabashooyin la xiriira xuquuqaha madaniga ama xuryadda dad-weynaha? Haddii aad rumeysan tahay in shaqaale DHS u shaqeeye ama barnaamij ama howl ay DHS ay wado ay xuquuqdaada ku xad-gudubtey, waxaan dooneynaa in aan warkaaga maqalno. Foormkan soo buuxi, ama soo qor email ama warqad.**

Miyaad kala kulantay barnaamij, howlgal, ama wareegto DHS ay leedahay:

- Takoor ku saleysan jinsigaaga, halka aad ka soo jeedo, asal qaran, (oo ay ku jiraan ku hadalka luqadda)diin, jinsi, qof ahaantaada, ama la'xaad la'aan? (Ogoow: Foormkan ha u isticmaalin in aad kaga dacwooto waxyabo ku saabsan takoor shaqo; eeg [www.dhs.gov/eeo](http://www.dhs.gov/eeo) .)
- Diiidmo micno muhiimad weyn ku fadhiya ee helista barnaamijyada, howlaha, ama adeeggaha ay bixiso DHS ama ay taageerto ayadoo ay ugu wakan tahay ku hadalka luqadda?
- Xad gudub ku aadan xuquuqdaada inta aad laanta socdaalka gacantooda ku jirtey ama lagugu haystey arrimo la xiriira laanta socdaalka?
- Takoor ama weydiimo su'aallo aanan habooneyn ee la xiriira soo gelidda Mareykanka?
- Xad gudub lagu sameeyey xuquuqdaada ku aadan hab-sami socodka sharciga, sida xuquuqdaada in waqt munaasib ah laguu caddeeyo eedeymahaaga ama aad la xiriirto qareenkaaga?
- Xad gudub la xiriira xog-dhowrka uu jideeyo Xeerka Haweenka ee Waxyeelista Lid ku ah?
- Ku-tagri fal jir dil ama ku-tagri fal kale oo oo adiga laguu geystey?
- Xad gudubyo kale oo xuquuqaha madaniga ama xuriyadda dad-weynaha oo la xiriira howlgal ama barnaamijyo ay bixiso DHS?

**Faaloyin ku aadan Xog-Dhowr iyo Shaacin:**

- A) Waxaad ahaan kartaa qof aan is shaacin adiga oo aanan ku buuxineyn magacaaga qeybtan hoose. Hase-yeshee, waxaa laga yaabaa in CRCL ay awoodi wayso in ay baaritaan ku samayso cabashadaada haddii aadan qorin macluumaad ku filan oo baaritaanka lagu qabto.
- B) Bixinta macluumaadka aad na siineyso, oo ay ku jirto aqoonsigaaga, waa mid lagu saleeyo 'baahi-ogaansho', oo waxaa looga munaaqishoonayaa Qoraalka Qarsoodiga ee dhamaadka dokumentigan. **HADDII CALAAMADDA SAXDA AH AAD SAARTO SANDUUQQA HOOSE, AQOONSIGAAGA UMA SHAACINEYNO XAFISYO KALE, GUDAHA AMA DIBADDHA DHS** (aysan ka ahayn haddii ay lagama maarmaan u tahay baaritaan fal-dambiyeed). Ogoow, hase-yeshee, in ay tani inta badan keeni karto inay

*adkaato amaba suurto galba noqon waydo, dhab ahaantii, inaan baaritaan ku samayno eedaymaha aad soo feedisay.*

- Anigu ma doonaayo in CRCL ay magaceyga u shaaciso xafiisyada kale, oo waan ogsoonahay in go'aankan uu badanaaba ka dhigayo mid aan suurto-gal u ahayn baaritaan dhaco.*
- C) Aar-gudasho ku aadan qofka u soo dacwooda CRCL waa sharci daro; haddii aad dareensan tahay in aad tahay dhibano loo geystey aar-gudasho, NAGA SOO WAC. 1-866-644-8360.**

## Macluumaad Cabasho

Haddii af Ingiriisiga aadan ku hadlin/aqrin, CRCL waxay heli kartaa turjumaanno luqad kasta kugula hadli kara.

**① Macluumaad ku saabsan shaqsiga la kulmey xad-gudub ah xuquuqaha madaniga/xuryadaha dad-weynaha**

*(buuxi waxa aad ka buuxin karto)*

Magaca: \_\_\_\_\_

*Magaca Hore iyo Dhexe*

*Magaca Dambe*

Talefoon Lambar: Moobel: \_\_\_\_\_ Telfoonka Guriga: \_\_\_\_\_ Telfoonka Shaqada: \_\_\_\_\_

Fadlan ogsoonow waxaa laga yaabaa in aan kaagala soo xiirno lambarada aad na siisey

Cinwaanka Boostada: \_\_\_\_\_

*PO Box ama Street address*

*Degmada (City)*

*Gobolka (State)*

*Sumadda Boostada (Zip)*

Tariikhda Dhalashada: \_\_\_\_\_ Email (iqtiyaariga): \_\_\_\_\_

Lambarka Diiwaangelinta Shisheeyaha (Alien #). (*haddii aad leedadahay oo aad heli karto*): \_\_\_\_\_

Halkan calaamadee haddii aad hadda xiran tahay.

Xabsigee? \_\_\_\_\_

*Magaca xabsiga*

*Cinwaanka xabsiga*

Halkan calaamadde haddii arrintan qareen uu kuu matalayo. Fadlan ku qor magaca qareenka iyo macluumaadka lagual xiriyo \_\_\_\_\_

**② Miyaad foomkan cabashada u buuxinaysaa qof kale? Haddii ay haa tahay, fadlan qor macluumaadkaaga.**

Magaca:

*Magaca Hore  
Shaqadaada waxay tahay*

*Magaca Dambe*

Ururka (*haddii uu jiro*): \_\_\_\_\_

Talefoon Lambar: Moobel: \_\_\_\_\_ Telfoonka Guriga: \_\_\_\_\_ Telfoonka Shaqada: \_\_\_\_\_

Cinwaanka Boostada: \_\_\_\_\_

*PO Box ama Street address*

*Degmada (City)*

*Gobolka (State)*

*Sumadda Boostada (Zip)*

- ③ **Maxaa dhacey?** Qeex cabashadaada. Inta suurto-gal ah naga sii Macluumaad badan oo ku saabsan waxa aad la kulantey.

**Goormey tani dhacdey? Haddii ay weli socoto, fadlan ku qor goorta ay dhibaatadu bilaabatey.**

(*Haddii ay dhacdey in ka badan hal mar, ku wada qor taariikhaha ay dhaceen*):

**Halkee tani ka dhacdey?**

Goobta (*tusaale ahaan, ku qor magaca gooobta lagugu hayay, garoonka diyaaradaha, meel kale*): \_\_\_\_\_

Degmada (City): \_\_\_\_\_ Gobolka ama Wadanka: \_\_\_\_\_

**④ Yaa cadaalad darada kugusameeyay?**

Shaqaale, qandaraasle, ama sarkaal ka tirsan (calaamadde inta quseysa):

- Adeegyada Muwaadinnimada iyo Socdaalka ee Mareykanka (USCIS – Citizenship and Immigration Services)
  - Ilaalada Xuduudaha iyo Canshuur-bixinta (CBP – Customs and Border Protection)\*
    - Sarkaalka Canshuur-bixinta
    - Wakiil Ilaaliyaha Xudduuda
  - Wakaaladda Federaalka ee Maareynta Xaaladaha Degdega (FEMA- Federal Emergency Management Agency)
  - Fulinta Socdaalka iyo Canshuur-bixinta (ICE- Immigration and Customs Enforcement)
  - Adeegga Sirta (USSS)
  - Maareynta Amniga Gaadiidka (TSA- Transportation Security Administration)\*
  - Ilaalada Xeebta Mareykanka (USCG-United States Coast Guard)
  - Barnaamijyada kale ee DHS (*magacow*) :
- 

- Ma hubo xafiiska DHS ee uu ahaa
  - Shaqaalaha aan DHS ahayn ee hoos yimaada amarka DHS (tusaale, sarkaalka 287g)  
gaar ahaan:
- 

\*Haddii ay cabashadaadu ku saabsan tahay dhacdo ka dhacdey garoonka diyaaradaha, rugta tariinada, ama xuduudaha dalka laga soo galo, sidoo kale waxaad cabasho ka feylgareyn kartaa Hay'adda Nabadsugidda Wadanka (Department of Homeland Security) Barnaamijkeeda (Traveler Redress Inquiry Program (TRIP) TRIP, Xafiiskanna si wadajir ah ayuu u eegayaa cabashadaada, taasoo dhelineysa jawaab-celin dhaqso ah. Aad: [www.dhs.gov/trip](http://www.dhs.gov/trip).

**⑤ Qor qof kasta ee kale oo laga yaabo in ay arkeen ama ay maqleen waxa dhacey.**

(*Haddii aadan garaneyn magacyadooda, tafaasiil kasta ka bixi*)

Magacyada (ama maclummaad kale, tusaale ahaan, hay'adda):

Cinwaanka Boostada:

Wadanka:

PO Box ama Street address  
Sumadda Boostada (Zip)

Degmada (City)

Gobolka ama

Talefoon Lambar:

Email:

*Haddii loo baahdo, ku sii qor bog dheeraad ah*

**⑥ Miyaad waxyaabo cabashadaan ku saabsan kala xiriirtey hay'ad kale oo qayb ka ah DHS ama hay'ad kale ee dowladda dhexe, mid gobol, ama dowladda hoose ama maxkamad ?**

Haa: Hay'ad/Xafiis/Maxkamad \_\_\_\_\_ Taariikh:

Maya

**Haddii ay haa tahay, ma jiraa qof cabshadaada ka soo jawaabey?**

**Haa**  **Maya**

Haddii ay *Haa* tahay, qeex waxa laga qabtay cabashadaada:

*Haddii loo baahdo, ku sii qor bog dheeraad ah*

- ⑦ **Miyay jiraan macluumaad kale oo aad dooneysyo in aan wax ka ogano ama xisaabta ku darsano?**

*Haddii loo baahdo, ku sii qor bog dheeraad ah*

⑧ Haddii luqadda Ingiriisiga aadan ku wanaagsaneyn, fadlan qor luqadda aad doorbideyo ee aan kugula xiriireyno.

---

⑨ Haddii ay dhibaato kaa haysato fahamka foormkan ama su'aal kale ee kasta, la xiriir CRCL:

E-mail: [crcl@dhs.gov](mailto:crcl@dhs.gov)

Talefoon: Guddaha: 202-401-1474  
ama

Qatka Bilaashka: 866-644-  
8360

**Qadka Dadka Maqalka ku Adag  
(TTY):** Qadka Guddha ee TTY: 202-  
401-0470

Qadka Bilaashka ee TTY:  
866-644-8361

Fakis: 202-401-4708

Kala soo xiriir Adeegga Boostada Mareykanka U.S. Postal Service:

Department of Homeland Security

CRCL/Compliance Branch

245 Murray Lane, SW

Building 410, Mail Stop #0190

Washington, DC 20528

Ogoow: Tallaabooyin ammaanka awgeed, waxay qaadan kartaa ilaa 4  
sitimaan in aan ku helno boostada U.S. mail.

⑩ Foormkan email ahaan si aad ugu soo dirtol, fadlan kaydi, ku la lifaaq, oo ku  
soo dir ku soo dir: [crcl@dhs.gov](mailto:crcl@dhs.gov). Fadlan ku soo lifaaq ama soo dir dhamaan  
macluumaadka aad ku taageereyso cabashadaada, sida dokumentiyada,  
sawirada, diiwaan-gelinta caafimaadka, ashtakooyin, ama qoraalada  
marqaatiga.

Soo gudbi nuqdooyinka, ayaga oo aan nuqdooyinka asliga aan ahayn; dokumentiga  
cabashadan ku soo qor magacaaga iyo taariikhda. (U soo fakis garee: 202-401-4708, ama  
dокументиада email ahaan ku soo dir [crcl@dhs.gov](mailto:crcl@dhs.gov), ama cinwaanka kor boosto ahaan ugu  
soo diri.)

**Adiguna hayso nuqdo ah cabashadan oo diiwaankaaga geli.**

### Oraahda Xeerka Wax Qarsoodiga

Hoos yimaada 6 U.S.C. § 345 iyo 42 U.S.C. § 2000 ee-1, Xafiiska Xuquuqaha Madaniga iyo  
Xuriyadda Dad-weynaha (CRCL) waxaa loo amray in uu baaritaan ku sameeyo cabashooyinka  
iyo macluumaadka ka imaanaya dadwaynaha ee ku saabsan xad-gudubyada xuquuqaha  
madaniga ama xuryadda dad-weynaha ee la xiira shaqaalaha, barnaamijyada ama howlaha  
DHS. Sharciga dowladda dhexe, ee loogu yeero Xeerka Qarsoodiga, aaya wuxuu oronaya  
waa in aan sharaxnaa sida aan u dhowreyno macluumaadkaaga inta aan wadno howsha  
cabashadaada.

Haddii cabashadaada ay ku haboontahay inuu qabto xafiis kale ee dowladda dhexe, xafiiskaasi  
ayaan u direynaa. Si aan u baarno cabashadaada, CRCL waxay macluumaadkaaga ku saabsan  
cabashadaada u shaacin doontaa xafiisyada DHS ee ku haboon, oo ay ku jirto Xafiiska  
Ilaaliyaha Guud. Sidoo kale CRCL waxaa laga yaabaa in macluumaadka qaarkood ee  
cabashadaada ay shaaciso haddii sharcigu amro ama haddii aysan jirin wax qarsoodiga ah ee  
ay saameyneyno. Tusaale ahaan, Kongareeska ka aaya seddexdii biloodba mar u dirnaa  
warbixino ku saabsan cabashooyinka dadwaynuhu soo gudbiyaan.. Warbixintan waxay  
qeexeysaan **noocyada** cabashooyinka, mana raacino **macluumaadka shaqsi**. Si aad u aqriso  
warbixinadeena hore, aad [www.dhs.gov/crcl](http://www.dhs.gov/crcl).

Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan Xeerka Qarsoodiga aad Xarunta Macluumaadka Dowladda Dhaxe [www.pueblo.gsa.gov](http://www.pueblo.gsa.gov).

**Waxaad isticmaali kartaa boggaga soo socda si aad u raaciso macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan cabashaddada haddii loo baahdo. Fadlan ku magacow lambar(rada) aad ka sii wadaysid.**

*Boggan ka sii wad, haddii aad u baahato.*

*Boggan ka sii wad, haddii aad u baahato.*